

Fursadaha *Internetka Dadka Saboolka ah ee Seattle*

Shirkadahan waxay qaadaan qiyaastii \$10 bishii internet Seattle gudaheeda oo xawaarihiisu sarreeyo. Adigoo adeegsanaya barnaamijyadan, waxaad hubin kartaa iimeylka, laymanka guriga ka shaqayn kartaa, shaqo raadin kartaa, biilasha bixin kartaa, daawan kartaa fiidyowyo gaagaaban, soo dejisan kartaa muusig iyo waxyaalo kale



INTERNET ESSENTIALS BY COMCAST (INTERNETka DARUURIGA AH EE COMCAST)

(855) 846-8376 ama <https://internetessentials.com> si aad u dalbato ama u hesho macluumaad dheeraad ah

- Internet bilaa qiyaas ah oo bishii ah \$9.95 (xawaare gaadhaya 15Mbps soo dejinta iyo 2Mbps qaadista) + cashuurta. Ma jiraan shuruudo ama hubin xagga daynta ah. Waxa kamid ah rakibaad bilaash ah iyo Wi-Fi guriga gudihiisa ah. Waa inaad deggan tahay aagga adeegga Comcast.
- Dadka mutaystay:
 - Dadka deegaanka ee saboolka ah ee deggan guryaynta dawladda ama qaata kaalmada Guryaynta iyo Magaalada (HUD).
 - Qoysaska leh carruur kujirta barnaamijka qadada bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyey ee dugsiga ama dhigta dugsi loo qalma.
 - Dadka waayeelka ah 62+ iyo saboolka.
 - Halgamayaasha saboolka ah ee qaata dheefaha gobolka ama fadaraalka.
- Uma qalantid haddii lagugu leeyahay biilashada Comcast oo sanad wax ka yar taagan ama aad helaysay adeegga Internetka Comcast 90-kii maalmood ee u dambeeyey.



SIMPLY INTERNET BY WAVE (INTERNET FUDUD OO WAVE)

(206) 386-1989 si aad u hesho agabka dalabka iyo xaqiijinta barnaamijka Seattle Utility Discount

- Adeeg Internet oo ah \$9.95 bishii (xawaaraha ilaa 10Mbps). Lama eegayo daynta, heshiisyo iyo qalab la kiraysanayo. Waa inaad deggan tahay aagga adeegga Wave.
- Waxa kamid ah rakibaad bilaash ah iyo Wi-Fi guriga gudihiisa ah.
- Mutaysiga waxa kamid ah:
 - Cid kasta oo u qalanta Seattle Utility Discount Program; ama
 - U qalma guriyaynta la kabo ee dadka saboolka ah; ama
 - Leh ilme u qalma barnaamijka qadada dugsiga ee bilaashka ah ama qiime dhimista lagu sameeyey.

Wixii macluumaad dheeraad ah la xiriir: Brenda Tate kala xiriir 206-386-1989 ama iimeylka

brenda.tate@seattle.gov

Somali

MOBILE CITIZEN THROUGH INTERCONNECTION (JIILKA MOBILKA OO LA ISKU XIDHO)

(206) 633-1517, <https://connectall.org/internet.html>, ama tukaankooda ku yaala 1109 N 35th St, 98103

- Internet bishii ah \$11.95 oo ah xidhiidhka Sprint 4G LTE Internet oo aad ka helayso Mobile Citizen.
- Kharashka lacagta oo halmar la bixiyo oo ah \$99 modem-ka LTE. Cashuurta iyo soo qaadistu kuma jiraan.
- Waa bilaa qiyaas; ma jiraan gaabis internetka ah ama isticmaalka dheeraadka ah oo lacag lagaa qaadayaa.
- La isticmaali karo mar kasta oo uu jiro adeegga Sprint 4G LTE.
- Laabtobyoo iyo kombiyuutarada dhaskitobka oo dib loo soo hagaajiyey (oo ka bilaabma \$109) oo leh Microsoft Office Home & Business 2010 iyo 1 sano oo dammaanad ah.
- Dadka hela kaalmada Waaxda Adeegyada Caafimaadka Gobolka (DSHS) ama dakhligu a hooseeyo 80% Celceliska Aagga.

Wixii macluumaad dheeraad ah la xiriiir: Brenda Tate kala xiriiir 206-386-1989 ama iimeylka

brenda.tate@seattle.gov

Somali